Industritekniska programmet

SOMALISKA

2010-12-15

Barnaamujka farsamaha warshadaha

Utbildningsinfo

Skolverket

Barnaamujka farsamaha warshadaha waa barnaamuj xirfadeed oo lagu qaadanaayo shahaado xirfadeed.

Barnaamujka farsamaha warshadaha wuxuu ku habboonyahay qofkii rabo in uu ka shaqeeyo soo saaridda badeecad, ammaanka socodsiinta, dayactirka iyo alxameynta xagga farsamaha warshadaha. waad ka qeybqaadaneysaa qorsheynta iyo naqshadeynta soo saaridda iyo ka shaqeysiinta. waxaad baran doontaa maareynta nidaam farsamo oo horumarsan.

Shaqada waxaad bilaabi kartaa toos marka aad waxbarashada dhameysid ama waxaad aadi kartaa jaamacadda xirfadaha, oo waxbarashadaada ku sii wada kartaa. Waxaa kale aad doorankartaa in aad koorsooyin dheeraad ah akhrisatid si aad jaamacadda u aadid.

AFAR JIHO OO KALA DUWAN

Amaanka socodsiinta iyo farsamaha dayactirka

- waxaad wax ka baran doontaa dayactirka qorsheysan iyo nidaamsan. Jihadu waxa ay ku siineysaa fursad aad uga shaqeysid shaqo oo tusaale ahaan ah mekaaniga awtomashonka, mekaaniga adeegaha iyo mekaaniga dayactirka.

Farsamaha isbeddelka

- Waxaad wax ka baran doontaa isbeddelka warshadaha oo kiimikada iyo mekaaniga ah, kontaroolidda tayada, farsamaha hogaaminta- iyo nidaaminta. Jihadu waxa ay ku siineysaa fursad aad uga shaqeysid shaqo oo tusaale ahaan ah rinjiyeynta warshad, farsamo yaqaanka qololka shaybaadhka marka laga hadlo warshadaha kiimikada iyo hawl-wadeenka isbeddelka.

Farsamaha badeecad- iyo mashiin

- Waxaad wax ka baran doontaa habka loo mareeyo qalab,qalabka warshadaha iyo alaabta warshadaha. Jihadu waxa ay ku siineysaa fursad aad uga shaqeysid shaqo oo tusaale ahaan ah hawl-wadeenka CNC oo macdanka iyo alwaaxa ah, bir-shubaha, hawl-wadaha mashinka, najaarka mashinka, aasaasaha, ka shaqeeyaha madbacad, farsamo yaqaanka wax soo saarka, hawl-wadaha wershada farayaamada iyo najaarka qalabka.

Farsamaha alxameynta

- Waxaad wax ka baran doontaa farsamaha alxameynta iyo daryeelka waslada birta. Jihadu waxa ay ku siineysaa fursad aad uga shaqeysid tusaale ahaan ah alxame.

Waxaan baad barnaamujka ku baran doontaa

Waxaad wax ka baran doontaa farsamaha wershadaha iyo wax soo saaridda. Waxaad meerayn doontaa qalab, alaab iyo isbeddel. waxaad wax ka baran doontaa safafka wax soo saaridda, shaqada ururka, shaqaalaha badeecad, isticmaalidda alaabta cayriinka ah iyo tamarta, hubinta tayada iyo sida doorashada alaaba, hab shaqo iyo farsamo ay raad ku yeeli karaan bulshada iyo deegaanka.

Barnaamujka waxaa miisaanka la saarayaa su'aalaha ku saabsan deegaanka shaqada si looga hortago dhaawacyada shaqada iyo si loo dhiso caafimaad fiican.

Sidaan buu barnaamijku u diyaarsanyahay

Barnaamijka xirfadeed maadooyinka dugsiga sare oo wadajirka loo leeyahay waa: ingiriis, taariikh, ciyaaraha- iyo caafimaadka, xisaabta, cilmiga sayniska, cilmiga diiniga, cilmiga barashada mujtamaca, iswiidhishka ama iswiidhishka oo luuqadda labaad ah. barnaamijka xirfadeed waxaad akhrisan doontaa maadooyin xirfadeed oo badan, oo loo yaqaano maadooyinka sifooyinka, iyo maadooyinka aad ku soo dhigatay dugsiga aasaasiga ah oo yaraaday.

Maadooyinka sifooyinka wadajirka loo leeyahay ee barnaamijka waa: ibeddelka farsamaha wershadaha, wershadaha iyo bani aadamka, cilmiga wax soo saaridda iyo qalabka wax soo saaridda.

Waxaad fursad u helaysaa in aad ku takhasustid oo aad cilmi dheeraad ah u yeelatid barnaamijka. Waxaa taas la dhahaa si qoto dheer ah barnaamijka loo galo. Iskoolka ka wareyso maadooyinka si qoto dheer ah loo sii galayo oo ay soo bandhigayaan.

Sidoo kale waxaad leedahay doorasho gaar ahaaneed oo aad dooran kartid waxa aad akhrisaneysid. Iskoolka weydii koorsooyinka ay heystaan.

Habka shaqada

Barnaamujku wuxuu ka ambaqaadmaa dhibaatooyin kala duwan oo waaqici ah, oo aad dhibaatooyinkaas la xallineysid dad kale ama keligaa. Waxaad tabo bareysaa awoodaada wax bilaabidda iyo wax cusub soo saaridda, sidoo kale waxaad baraneysaa habka shirkad aad leedahay loo wado. waxaad baraneysaa habka wax loo qorsheeyo, la gudagalo iyo in shaqada la caddeeyo oo warqad ahaan loo qoro iyo horumarinta shaqada.

Shaqada dugsiga sare

Dhamaadka barnaamujka farsamaha wershadaha waxaad suubineysaa shaqada dugsiga sare oo waxaad ku suubineysaa goobta xirfadeed aad dooratay. Markaas waxaad muujineysaa in aad heshay cilmiga loo baahanyahay si loo bilaabo in lagu shaqeysto waxa aad baratay.

Shaqo gacmeed

Qeybab ka mid ah waxbarashada waxaa lagu qabanayaa hal ama meelo badan oo goobab shaqo ah, ugu yaraan 15 isbuuc, waxaana la dhahaa shaqo gacmeed (APL). waa qeyb muhiim ah oo ka mid waxbarashadaada, sidoo kale waxaa jiro fursad ah in lagu suubiyo shaqo gacmeedka wadamo kale aan Iswiidhan ahayn. Waayo aragtinimadu waxay ku siinaysaa xiriiryo oo aad ka faa'iideysan kartid marka aad shaqo raadsaneysid.

Waxbarashada tababartaha

Barnaamujka dhexdiisa waxaa jirto fursad lagu doorto waxbarasho tababarte oo dugsiga sare ah. Taas micnaheedu waa in aad helaysid isku cilmi laakiin ugu yaraan waxbarashadaada barkeed waxaad ku suubineysaa hal meel ama meelo badan oo goob shaqo ah.

Arrin in lagu fikiro u baahan

Haddii aad rabtid u qalmida jaamacadda waxaa muhiim ah in aad qorsheysatid daraasooyinkaada. Doorashada gaarka ah dhexdeeeda, iyo ama haddii iskoolku soo bandhigo, si qoto dheer ah in loo dhex galo barnaamujka waxaad dooran kartaa in aad akhrisatid koorsooyinka loo baahanyahay si loo helo u qalmidda jaamacadda oo aasaasi ah. Kuwaasi waa koorso oo iswiidhish ah ama iswiidhish oo luuqadda labaad ah iyo koorso ingiriis ah. Waa ay fiicantahay in lala hadlo macallinka xirfadaha- iyo waxbarashada, haddii aad rabtid in aad jaamacad aadid.

Markasta waxaad xaqq u leedahay, doorashada gaarka ah dhexdeeda, in aad dooratid koorso sii dheer oo ciyaaraha- iyo caafimaadka ah iyo koorso bilic ah.